

Isticmaalka Badbaadada leh ee MyPCC

Waxaa jira hab cusub oo lagu galo MyPCC. Dhammaan ardayda iyo shaqaaluhu waa inay isticmaalaan. Waxay bilaabanaysaa 8-da Abriil, 2026. PCC waxay rabtaa inay ilaaliso akoonkaaga. Waxaan isticmaalnaa **MFA**. Tani waxay ka dhigan tahay Xaqijinta Qodobbada Badan.

Waa maxay MFA?

MFA waxay ka dhigan tahay isticmaalka **laba tallaabo** si aad u gasho akoonkaaga. Waxay ka hortagtaa dadka kale inay isticmaalaan akoonkaaga.

Sida loo galo:

1. Geli **magacaaga** iyo **eraygaaga sirta ah**.
2. Eeg **taleefankaaga**.
3. Guji "**Haa**"ama geli **koodhka** aad ka heshay taleefankaaga.
4. Waad gashay!

Sideen u dejin karaa?

Waxaad ku heli kartaa koodhkaaga 4 hab oo kala duwan. Waxaa fiican in aad leedahay in ka badan hal hab. Dooro 2 ama in ka badan oo habab ah:

- **Abka** taleefan oo la yiraahdo Microsoft Authenticator (u tag bogga 2aad)
- **Farriin qoraal ah** (u tag bogga 3aad)
- **Wicitaan taleefan** (u tag bogga 3aad)
- **Furaha amniga jireed** (u tag bogga 4aad)

Ma u baahan tahay caawimaad?

- **Wac:** 971-722-4400
- **limayl:** servicedesk@pcc.edu
- **Websaydh:** www.pcc.edu/mfa



Sida Loo Isticmaalo Microsoft Authenticator

1. Taleefankaaga

- Ku soo dejiso abka **Microsoft Authenticator** dukaankaaga Abka.
- Fur abka oo dooro **Add work or school account (Ku dar akoon shaqo ama iskuul)**.

2. Kombiyuutarkaaga

- Gali akoonkaaga iimaylka PCC.
- Guji **Next (Xiga)** ilaa aad ka aragto **koodh QR ah** (afar geesood madow iyo caddaan ah).

3. Isku xidh iyaga

- Isticmaal taleefankaaga si aad u **iskaanto** koodhka ee ku jira shaashadda kombiyuutarka.
- Kombiyuutarku wuxuu muujin doonaa **lambar**.
- Geli **lambarkaas** taleefankaaga.

4. Dhameystir

- Guji **Done (Dhameystir)** kombiyuutarkaaga. Diyaar baad tahay!

Ma u baahan tahay caawimaad?

Wac PCC lambarka 971-722-4400.

Sida Loo Isticmaalo Taleefankaaga Si Aad U Gasho Akoonkaaga

Isticmaal tilmaamahan haddii **aadan** haysan abka taleefanka casriga ah.

1. Kombiyuutarkaaga

- U tag **aka.ms/mysecurityinfo**
- Galo adigoo isticmaalaya iimaylkaaga iyo eraygaaga sirta ah ee akoonkaaga PCC.



2. Dooro Phone (Taleefan)

- Guji **I want to set up a different method (Waxaan rabaa inaan dejiyo hab ka duwan).**
- Xulo **Phone (Taleefan).**
- Geli **lambarkaaga taleefanka.**

3. Ka jawaab Wicitaanka ama Eeg Qoraalkaaga

- PCC waxay wici doontaa taleefankaaga ama kuu soo diri doonta qoraal ay ku jirto koodh.
- Ka jawaab wicitaanka AMA eeg qoraalkaaga.
- Riix **#** furaha taleefankaaga.

4. Dhameystir

- Guji **Done (Dhameystir)** kombiyuutarkaaga. Diyaar baad tahay!

Ma u baahan tahay caawimaad?

Wac PCC lambarka 971-722-4400.

Sida Loo Isticmaalo Furaha Amniga

Isticmaal tilmaamahan haddii aad haysato fure USB jireed (sida YubiKey oo ka socda dukaanka buugaagta ee PCC).



1. Kombiyuutarkaaga

- U tag aka.ms/mysecurityinfo
- Galo adigoo isticmaalaya iimaylkaaga iyo eraygaaga sirta ah ee akoonkaaga PCC.

2. Dooro Security Key (Furaha Amniga)

- Guji **Add sign-in method (Ku dar habka soo gelitaanka)**.
- Dooro **Security key (Furaha amniga)**.
- Guji **USB device (qalabka USB-ga)**.

3. Ku xidh Furahaaga

- Ku xidh furaha kombiyuutarkaaga.
- Taabo goobada midabka dahabka ah ama badhanka ku yaal furaha.
- Sii furahaaga magac (sida "Furahayga").

4. Dhameystir

- Guji **Dhameystir**. Diyaar baad tahay!

Ma u baahan tahay caawimaad?

Wac PCC lambarka 971-722-4400.